

RÖSTA

U CODEE MAALINTA DOORASHADA 13 SEBTEEMBAR!

Soo qaado:

- Aqoonsi, tusaale ahaan kaarka aqoonsiga ama baasaboorka. Haddii aadan haysan aqoonsi, qof kale ayaa xaqiijin kara aqoonsigaaga.
- Kaarka codbixinta oo lagu soo diro cinwaankaaga. Haddii aadan haysan, waxaad caawimaad ka heli kartaa goobta codbixinta.
- Kaarkaaga codbixinta waxaa ku qoran cinwaanka goobta codbixinta. Haddii aadan haysan ama aadan hubin, wac 031-365 00 00 ama tag goobta codbixinta kuugu dhow.



www.val.se

**Ka dhig codkaaga
mid la maqlo!**

Mashruuca RÖSTA waa olole doorasho oo aan ku xirnayn xisbi gaar ah oo ay qabato ABF Väst. Ujeeddadu waa in la xoojiyo dimuqraadiyadda ee degmooyinka ay ka shaqeyso ABF Väst iyada oo loo marayo dadaallo iyo hawlo kordhiya ka qaybgalka iyo aqoonta doorashada 2026. Mashruuca waxaa hore loo qabtay 2018 iyo 2022.



RÖSTA

Marka dad badan aysan codeyn, dimuqraadiyaddu way daciiftaa. Göteborg iyo Galbeedka Iswiidhan waxay leeyihiin kala duwanaansho weyn oo ku saabsan ka qaybgalka doorashada.

Iswiidhan waxay lahayd xuquuq cod-bixin guud muddo 100 sano ah. Isticmaal codkaaga si aad u saameeyso bulshada.

U codee bulsho ka wanaagsan adiga iyo qoyskaaga. Mar walba si qarsoodi ah ayaad u codeysaa. Qofna ma ogaan karo waxa aad u codeysay.

**Codkaagu waa muhiim
wuxuuna sameeyaa farqi!**

Haddii aad ku diiwaangashan tahay Iswiidhan saddex sano – waxaad ka codeyn kartaa doorashada degmada iyo gobolka.

Haddii aad tahay muwaadin Iswiidhish ah - waxaad ka codeyn kartaa doorashada baarlamaanka, gobolka iyo degmada.

YAA XAQ U LEH INUU CODEEYO?

Baarlamaanka:

- Waa inaad buuxisay 18 sano oo aad tahay muwaadin Iswiidhish ah.

Degmada iyo gobolka:

- Waa inaad buuxisay 18 sano.
- Looma baahna inaad tahay muwaadin Iswiidhish ah si aad u codeyso. Waxaa kugu filan inaad ku diiwaangashan tahay Iswiidhan saddex sano oo isku xigta ka hor maalinta doorashada.

SIDEE LOO CODEEYAA?

- Waxaad helaysaa saddex baqshadood haddii aad ka codeyn karto saddexda doorasho.
- Haddii aadan ahayn muwaadin Iswiidhish ah waxaad codeyn kartaa laba doorasho oo waxaad helaysaa laba baqshadood.
- Warqadaha codbixinta ee dhammaan xisbiyada waxay yaalliin goobta codbixinta: jaalle (baarlamaanka), buluug (gobolka) iyo caddaan (degmada).
- Qaado warqadaha aad rabto. Waxaad calaamadeyn kartaa qof ku jira warqadda, laakiin khasab ma aha.
- Ku rid warqad kasta baqshad adigoo laabin.
- U tag shaqaalaha codbixinta adigoo wata baqshadahaaga iyo aqoonsigaaga. Waxaa lagaa diiwaangelinayaa liiska, baqshadahana sanduuqa ayaa lagu ridayaa.

Horay u codee!

- Waxaad horay u codeyn kartaa laga bilaabo 26 Agoosto.
- Waxaad ka codeyn kartaa goobaha codbixinta ee dalka oo dhan.

SIDA DIMUQRAADIYADDA UGA SHAQEYSO ISWIIDHAN

Iswiidhan waa dimuqraadiyad matalaad ah. Taas micnaheedu waa in dadku ay doortaan siyaasiyiin doorasho xor ah. Waxaan u codeynaa xisbiyo iyo dad ka qayb qaadanaya go'aan gaarista dalka, gobolka iyo degmada.

Sida ay u dhacdo:

- Waxaan u codeynaa xisbiyada gala baarlamaanka.
- Xisbi waa inuu helo in ka badan 4% codadka si uu u galo baarlamaanka.
- Xisbiyada hela codadka ugu badan waxay samayn karaan dowlad.
- Dowladda ayaa maamusha dalka waxayna doorataa wasiirro ka shaqeeya waaxyo kala duwan.
- Waaxyadu waxay ka shaqeeyaan arrimo kala duwan, tusaale ahaan waxbarashada ama daryeelka caafimaadka.
- Waxay sidoo kale mas'uul ka yihiin hay'ado sida Arbetsförmedlingen iyo Migrationsverket.
- Waxaan codeynaa afartii sano mar baarlamaanka, gobollada iyo degmooyinka.

U codee maalinta doorashada 13 Sebteembar!

- Kaarkaaga codbixinta waxaa ku qoran cinwaanka goobta codbixinta. Haddii aadan haysan kaarka codbixinta ama aadan hubin meesha aad ka tirsan tahay, wac 031-365 00 00 ama tag goobta codbixinta kuugu dhow si lagu caawiyo.